

Tix: GSH/01-F/13

Kalfadhiba: 3aad

Kulankiisa 36aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

2<sup>nd</sup> December 2013



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

**KU SAABSAN**

**KALSOONI KALA NOQOSHADA XUKUUMADDA  
RA'IISAL WASAARASE M.NE CABDI FAARAX  
SHIRDOON "SAACID"**

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Abdisalan" or a similar name.

**Muqdisho, 2<sup>da</sup> December 2013**

## GOLAHA SHACABKA:

### Markuu Arkey:

Soojeedinta (mooshin) ka dhan ah Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo ay soo gudbiyeen 168 Xildhibaan;

### Markuu Arkey:

Qodobka 69-aad Faqradda 2-aad Xarafka (e) ee Dastuurka sida ku-meel-gaar ah loo ansixiyey iyo Qodobka 75-aad Faqradihiisa 1-aad, 2-aad iyo 3-aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;

### Asaga oo ku Kulansan:

Kalfadhiga 3<sup>aad</sup> Kulankiisa 36<sup>aad</sup> ee 2<sup>da</sup> Disembar 2013:

### Qodobka 1aad:

Iyada oo ay Golaha fadhiyeen 250 (Laba Boqol iyo Konton) Xildhibaan, waxaa codeyey 249 (Laba Boqol Afartan iyo Sagaal) Xildhibaan. Golaha Shacabku wuxuu mooshinka Kalsoonni kala Noqoshada Xukuumadda ku meelmariyey aqlabiyyada 184 (Boqol Sideetan iyo Afar) Xildhibaan oo ayiday, 65 (Lixdan iyo Shan) Xildhibaan oo diiday, wax ka aamusayna ma jirin.

### Qodobka 2aad:

Sida uu qabo Qodobka 90aad ee Dastuurka Federaalka wuxuu Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya awood u siinayaa inuu kala diro Xukuumadda Federaalka haddii ay weydo codka kalsoonida Golaha Shacabka oo ah aqlabiyyad fudud ka kooban (50%+1) tirada guud ee Golaha iyo in uu soo magacaabo Ra'iisal Wasaare cusubba waxay saaran tahay Madaxweynaha JFS.

### Qodobka 2aad:

Sida uu xeerinayo Qodobka 90(d) ee Dastuurka Federaalka, taniyo inta uu Madaxweynaha soo magacaabayo lagana dhaarinayo Ra'iisal Wasaare iyo xubnaha cusub ee Golaha Wasiirada, waxaa xilka sii haynaya oo hawl-maalmeedka sii wadaya Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada kalsoonida lagala noqday, oo ahaanaya xukuumad xil-gaarsiin (caretaker government) sida ku cad Qodobka 103aad ee Dastuurka Federaalka.

Mne Muhammad Sh. Cusmaan "Jawaari"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

